


WARBIXINTA SAFARKA JABUUTI

12-17 ABRIL 2025



HORUDHAC

Wafdi heer sare ah oo uu hoggaaminaayo guddoomiyaha Aqalka Sare ee BJFS mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi oo casuumaad rasmi ah ka helay dhiggiisa guddoomiyaha Baarlamaanka Dalka Jabuuti mudane Delaite Maxamed Delaite ayaa safar shaqo u aaday magaalada Jabuuti ee Caasimadda Dalka Dalka Jabuuti taariikh **12 abriil 2025**.

Guddoomiyaha iyo wafdigiisu waxaa si habsami leh u soo dhaweeyay guddoomiyaha Baarlamaanka Jabuuti Mudane Delaite Maxamed Delaite iyo xubno ka tirsan Baarlamaanka Jabuuti, waxaana isla habeenkaa Guddoomiyaha iyo wafdigiisa casho sharafeed heer sare ah noo sameeyay Kaaliyaha Agaasimaha Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Soomaaliya Mudane Saadaq Cumar Xassan (Saadaq Joon) iyo marwadiisa Haybado Ismaaciil Cumar Geelle.

KULANKA GUDDOOMIYAYAASHA

Subaxnimadii sabtiga **13 Abriil 2021**,

Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyo wafdigiisii la socday waxay kulan mira dhal ah kula qaateen xarunta Baarlamaanka Jabuuti

Guddoomiyaha Baarlamaanka Jabuuti, labadiisa ku xigeen iyo guddiga Joogtada ah, iyagoo ka wada hadlay xaaladda guud ee labada dal, is dhaafsigii qibradaha sharci dajin iyo iskaashiga xiriirka

labada Baarlamaan, iyadoo intaas ka dib labada Guddoomiye ay is dhaafsadeen, isna guddoonsiiyeen billad sharafoo iyo hadiyado kale oo muhiim ahaa kana tarjumaya hiddaha iyo dhaqanka labada dal ee walaalaha ah, isagoo Guddoomiye Cabdi Xaashi mahad ballaaran u jeediyay Guddoomiyaha Baarlamaanka Jabuuti sida diirran ee loogu soo dhaweeyay Jabuuti isaga iyo wafdigiisii la socday.

Guddoomiyaha iyo wafdigiisa waxaa lagu soo wareejiyay soona kormeeray qaybaha kala duwan ee xarunta Baarlamaanka Jabuuti ka kooban yahay, waxaana la tusiyay xafiisyada kala duwan ee ay guddiyadu ku shaqeeyaan iyo hannaanka ay guddiyada Baarlamaanka Jabuuti uga shaqeeyaan howlaha Baarlamaanka ee sharci dajin iyo korjoogtaynta laanta fulinta Dalka Jabuuti.



Guddoomiyuhu wuxuu mahad ballaaran u jeediyay Guddoomiyaha Baarlamaanka Jabuuti, ku xigeennadiisa iyo xubnaha Baarlamaanka sida diirran eey u soo dhaweeyaan isaga iyo wafdigii la socday, wuxuuna sheegay in Jabuuti ay tahay dal aan walaalo nahay, iyadoo Aqalka Sare ee BJFS uu diyaar u yahay inan wada shaqeyno oon is dhaafsano khibradaha, iskana kaashanno baarlamaan goboleedyada aynu qaybta ka wada nahay.



KULANKA MADAXWAYE ISMAACIIL CUMAR IYO WAFDIGA GUDDOOMIYAHA AQALKA SARE



Markii uu soo dhamaaday kulankii Guddoomiyayaasha isla maalintaas, wafdigu wuxuu u soo dhaqaaqay dhanka Qasriga madaxtooyada ee Dalka Jabuuti waxayna kulan la qaateen Madaxweynaha Jamhuuriyada aan walaalaha nahay ee Jabuuti Mudane Ismaaciil Cumar Geelle, iyagoo iska xogwraystay xaaladda guud ee labada dal iyo xoojinta xiriirka walaaltinimo iyo iskaashi ee Soomaaliya Jabuuti.

Guddoomiye Cabdi Xaashi oo ka mahad celiyay soo dhowaynta diirran ee loogu sameeyay qasriga madaxtooyada Jabuuti, ayaa uga mahad celiyay madaxwaynaha Jabuuti kaalinta hagar la'aanta ah ee uu ka qaatay dowlad dhiska Soomaaliya, isaga oo xusay in kaalintaas walaaltinimo ay baaqi ku ahaan doonto qalbiyada shacabka Soomaaliyeed.

Dhankiisa, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti Mudane Ismaaciil Cumar Geelle oo Guddoomiyaha iyo wafdigu la socda ku soo dhoweeyay salaan gacaltooyo, ayaa

guddoomiyaha ku ammaanay kaalintiisa odaytinimo, waddaniyad iyo isku haynta Ummadda Soomaaliyeed oo Qarankooda uu cagta saaray waddadii nabadda.

BOOQASHADII MAGAALADA CARTA



Maalintii xigtay oo ahayd 14 Abriil 2025, Guddoomiyaha iyo wafdigiisa waxay booqasho ku aadeen magaalada Carta oo ah halkii lagu yagleelay Dowladdii kumeel gaarka ahayd sanadkii 2000.

Guddoomiyaha iyo wafdiga uu hoggaaminayo ee booqday magaalada Carta ayaa waxaa halkaasi kusoo

dhaweeyay Guddoomiye ku xigeenka koowaad ee Baarlamaanka Jabuuti Marwo Safiya Cilmi Jibriil, Xildhibaan ka tirsan Baarlamaanka Jabuuti, Maamulka magaalada, waxgarad iyo marti sharaf kale, waxaana loo sameeyay qado sharafeed iyo bandhig faneed heer sare ah oo lagu soo bandhigay heeso ka tarjumaya nabadda iyo iskaashiga labada dal.

Guddoomiye Cabdi Xaashi ayaa shacabka Carta uga mahad celiyay martigalintii ay u sameeyeen ergadii Soomaaliyeed ee ka qeyb qaadatay shirkii dib-u-heshiinta Soomaaliya ee lagu yagleelay dowladnimada Soomaaliya burburkii ka dib, wuxuuna sheegay in dadka Soomaaliyeed ay abaal weyn uga hayaan shacabka iyo Madaxwaynaha Jabuuti hiilka walaaltinimo ee ay u fidiyeen walaalohooda Soomaaliya.

Sidoo kale, guddoomiyuhu wuxuu ballan qaaday in nuxurka suugaantii lagu soo bandhigay xafladdii lagu soo dhawaynayay Guddoomiyaha iyo wafdigiisu oo ahayd mid gudbinaysa farriin nabadeed iyo midnimo Soomaaliyeed uu gudbin doonno gaarsiin doonno madaxda iyo shacabka Soomaaliyeed oo idil.

BOOQASHADA WAFDIGA EE SAFAARADDA SOOMAALIYA EE JABUUTI

15 Abriil 2025, Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi iyo wafdigiisu waxay booqasho ku tageen Safaaradda Soomaaliya ay ku leedahay dalka Jabuuti, halkaas oo uu ku soo dhoweeyay Danjiraha Soomaaliya u fadhiya Jabuuti **Mudane Salaad Cali Jeelle**.

Guddoomiyaha oo warbixin ku saabsan howlaha shaqo ee safaaradda ka dhagaystay Safiirka, ayaa dhinaca kale kormeer ku sameeyay qaybaha kala duwan ee safaaradda,



isagoo ku boorriyay safiirka iyo howlwadeennada kalaba in ay dardar geliyaan xoojinta xiriirka walaaltino ee labada dal iyo shaqada ay dalka iyo dadka Soomaaliyeed u haayaan.

Safaaraddu waxaa ka muuqday burbur iyo dayac badan, waxayna u baahan tahay dayac tir iyo dib u habayn lagu sameeyo dhismaha safaaradda iyo xafiisyadeeda, mana jirin howlwadeenno ku filan oo ka shaqeeya safaaradda. Intii uu kulanka safiirka iyo guddoomiyaha iyo xubnaha wafdiguba waxaa laga wada hadlay sidii wax looga qaban lahaa arrimahaas oo ay laga maarmaan tahay in wax laga qabto.

Safiirku wuxuu guddoomiyaha la wadaagay warqad codsi iyo qorshe ah oo ku saabsan sida wax looga qaban karo loona dayac tiri karo safaaradda taas oo guddoomiyuh ballan qaaday inuu la wadaagi doonno madaxwaynaha Jamhuuriyadda.

KULANKA XUBNAHA WAFDIGA AQALKA SARE IYO DHIGGOODA BAARLAMAANKA JABUUTI

Maalintii xigtay oo ahayd 16 Abriil 2025, xubnihii ka midka ahaa wafdiga Guddoomiye Cabdi Xaashi Cabdullaahi waxay kulan



gaar ah la qaateen qaar ka mid ah guddoomiyayaasha Guddiyada Baarlamaanka Jabuuti. Kulanka ayaa la isku dhaafsaday warbixinno guud oo la xidhiidha guud ahaan shaqada Baarlamaannada iyo hannaanka waajib gudasho ee guddiyada labada Baarlamaan ee

maanta shirka fadhiyay, kaalinta korjoogtayn isla-xisaabtan iyo qodob kale oo muhiim ah, iyagoo sidoo kale iska waraystay dhanka waayo-aragnimada, shaqada, curinta shuruucda iyo kaalinta haweenku ku leeyihiin sharci dejinta labada dal.

Habdhowraha Aqalka Sare Sanatar Samsam Ibraahim Cali oo xubnaha Aqalka Sare ee kulanka fadhisay hoggaaminaysay, ayaa uga mahadcelisay Guddoomiye ku xigeenka Baarlamaanka Jabuuti Marwo Safiya Cilmi Jibriil iyo dhammaan Golaha Baarlamaanka Jabuuti soo dhaweynta diirran ee ay u sameeyeen wafdiga Aqalka Sare, iyadoo tilmaantay in booqashadaani miro-dhalka ah iyo kulamadii ay wada qaateen ay horseedi doonaan sii xoojinta xiriirka shaqo, qibrad wadaagga iyo iskaashiga walaaltinimo ee labada labada Baarlamaan.

Galinkii dambe ee 17 Abriil 2025, wafdigu wuxuu dib ugu soo laabtay magaalada Muqdisho, waxaana soo sagootiyay Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Baarlamaanka Jabuuti Marwo Safiyo Cilmi Jibriil, maadaama uu Guddoomiyaha Baarlamaanka Jabuuti uu safar shaqo oo dag dag ah ugu ambabaxay Dalka Koongo.



XUBNAHA WAFDIGA AQALKA SARE

- 1- Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi – Guddoomiyaha Aqalka Sare.
- 2- Sen. Samsam Ibraahim Cali – Habdhowraha Aqalka Sare.
- 3- Sen. Dr. Cusmaan Maxamuud Dufle - Gudd Guddiga Horumarinta Arr. Bulshada.
- 4- Sen. Samsam Daahir Maxamuud – Xoghayn Guddiga Khayraadka
- 5- Sen. Maxamed Cabdi Cusmaan – Xoghayn Guddiga Difaaca Iyo Amniga.
- 6- Sen. Bilaal Idiris C/laahi – Xubin Guddiga Xeer-hoosaadka.
- 7- Md. Cabdinaasir Ibrahim Guuleed – Xoghaye Guud
- 8- Md. Faysal Maxamed C/Karim – Agaasimaha Warbaahinta iyo Xiriirka dadwaynaha
- 9- Md. Maxamed Salaad Cusmaan - Wariye
- 10-L/Xle Maxamed Aadan Maxamuud – Habmaamuus

DHAMAAD

